



Sidda Lagu Codsado Laysinkaaga Darawalka ee Minnesota (Laysinka Darwaladda ee Cid Walba la Siinayo)

How to Apply for Your MN Driver's License – (Driver's Licenses for All)

Ma qaadan karaa laysin?

Laga soo bilaabo bishii Oktoobar 1, 2023, dhamaan dadka qaan-gaarka ah ee Minnesota waxa ay codsan karaan laysinka caadiga ah ee la yiraa Nooca D (Class D). Sharci inaad leedahay iyo in kale arrintani ma quseeyso. Laysinkaaga aad qaadanaysaa ma laha waxa ku qoran oo calaamad ah oo ku saabsan inaad tahay muwaadin ama aad sharci wadanka ku leedahay.

Warqadan xogta aruursan ah waxaa loogu talagalay dadka aan waligood horey u qaadan laysinka darawalada ama haysta laysin darawalnimo oo wadan ajnabi ahi bixiyey.



Dooro Nooca Laysinka ah ee aad Rabto

Waxa aad kala dooran 3 laysin oo darawalada la siinayo: Mid Caadi ah, kan la Bilay ama Laysinka Darawalada ee soo ka baxa shuruudaha kan la yiraa Aqoonsiga Dhabta ah (REAL ID). Waxa aad ka heli kartaa [faahfaahinadda waxa la kala dooranayo barta](#) ee rugta Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka ee Minnesota <https://dps.mn.gov>.

Ogow: Laysinada Darawalada ee La Bilay iyo kan Aqoonsiga Dhabta ah (Real ID), waxa aad u baahan tahay inaad cadayso inaad tahay muwaadin ama inaad leedahay sharci xaq kuu siiyana.



Akhri Barana Akhbaarta Buuga Gacanta

Waxa aad ka akhri kartaa [Buuga Gacanta ee Darawalka ee Minnesota khadka \(online\)](#). Waxaa lagugu imtixaami aqoontaada fahamka sharciyada gaadiidka iyo calaamadaha wadooyinka. Waxaa aad ka qaadan kartaa [khadka \(online\) imtixaano lacagta la'aan](#) ah.



Horey- u sii Dalbo Balansana Imtixaankaaga Aqoonta

Riix “Horey u sii Dalbo Laysinka Darawalka” “(Pre-Apply for a Driver's License)” ee bogga Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka Minnesota [[Minnesota Driver and Vehicle Services \(DVS\)](#)]. Horey u sii dalbashadu (Pre-applying) waxa ay ka dhigi kartaa waqtigaaga sugida ee xafiiska mid yar. Waxay kaloo kaa caawin inaad hubiso inaad haysato dhamaan dukumiintiyadda saxda ah ee la isaga rabo laysinka aad doonayso inaad qaadato.

[Hel goob imtixaanada darawalada lagu qaado](#) oo kuu dhow bixisana imtixaanada aqoonta ah. Hoosta “*Service” (Adeeg), riix “Class D Knowledge Test” (Imtixaanka Aqoonta ee Heerka D) liiskan goobaha imtixaanku waxa uu kuu sheegi inay khasab tahay inaad balan u qabsato imtixaanka ama in aad iska tagi karo goobta. Haddii ay tahay inaad balan qabsato, riix barta

“Schedule Appointment” (Qabso Balan) ee bogga DVM ([DVS](#)). Waxaad kaloo balan ku qabsan kartaa telefanka adigoo wacaya khadka (651) 284-1234.

Ogow: Waa khasab inaad haysto turjumaad sax ah oo Afka Ingiriisiga ah wixii dukumiintiyo ah ee ku qoran afafka kale.

Tag Rugta DVS



Qaado imtixaanka Aqoonta

Waxa aad u baahan tahay inaad bixiso khidmad ah \$21.50 kolka aad halkaa tagto. Waxa aad ku bixin kartaa khidmadda jeeg, jeega idman, cadaan, kaarka bangiga ama kaarka amaahda. Xafiisyadda intooda badani waxa ay qaataan kaararka bangiyada iyo kuwa amaahda. Khidmadahu waa ay is bedeli karaan. [Eeg ka hor inta aadan tagan barta.](#)

Haddii aad ku dhacdo imtixaanka aqoonta labo goor, waa inaad bixiso \$10 mar walba oo aad mar kale isku daydo.



Ku Baasida imtixaanka Araga

Waxa ay meesha ku haystaan mashiino baara araga. Haddii aad caadiyan ookiyaale ama quraaradaha indhaha aad isticmaasho, waa aad u xiran kartaa kuwaa imtixaanka. Haddii aad ku dhacdo imtixaanka baarida araga, waxa ay ku oran waa inaad u tagto dhaqtar indhaha qaabilsan.



Dalbashada Barmidka

Waa aad dalban kartaa barmidkaaga ka hor inta aadan bixin. Ama waxa aad ha dhow ka [dalban kartaa xafiis](#) kuu dhow. Waxa ay ku siin barmid warqad ah oo ku meelgaar ah oo aad isticmaali karto inta uu kaarku kuugu imaanayo boostada. Taasi waxa ay qaadataa qiyaastii bil. Barmidkaaga tilmaamtu waxa uu shaqeyn 2 sanno lamana cusboonaysiin karo. Waxa uu kuu ogolaan inaad gaari kaxayso adigoo uu mar walba kula socdo darawal laysin leh oo 21-jir ah ama ka weyn. Hubi inaad sidato kolka aad baranayso darawalnimadda.

Kolka Aad Hesho Barmidkaaga



Barashadda Darawalnimada

Haddii aad tahay 18-jir aadna haysato barmid, waa khasab inaad soo barato darawalnimadda ugu yaraan 6 bilood inta aadan qabsan balanta imtixaanka wadadda. Haddii aad tahay 19+, waxa aad u baahan tahay inaad haysato barmidkaaga ugu yaraan 3 bilood ka hor inta qaadan imtixaanka wadadda. Haddii aad haysto laysinka darawalka ee wadan ajnabi ah, uma baahnid inaad sugto wax waqti ah ka hor inta aadan qabsan balanta imtixaankaaga darawalnimada ee wadadda.

Ogow: haddii aad rabto/u baahan casharo darawalnimadda ah inaad qaadato, waxa aad u baahan tahay inaad ka eegto khadka (online). Marmarka qaarkood waxa aad ka heli kartaa barayaal dadka bara darawalnimada dugsiyadda sare ee deegaankaaga.

Qabso Balantaada Imtixaanka Wadadda (sidoo kalena la yiraa imtixaanka xirfadaha)



[Hel goob imtixaanada darawalada lagu qaado](#) oo kuu dhow oo bixisa imtixaanka wadadda. Hoosta “*Service” (Adeeg), riix “Class D Road Test” (*Imtixaanka Wadadda ee Heerka D*). Liiskan goobaha imtixaanaddu wuxuu kaloo kuu sheegi hadii ay tahay khasab inaad balan u qabsato imtixaanka ama hadii aad iska tagi karto goobta. Haddii ay tahay inaad balan qabsato, riix barta “Schedule Apppointment” (*Qabso Balan*) ee bogga rugta ([DVS home page](#)). Waxaad kaloo balan ku qabsan kartaa telefanka adigoo soo wacaya khadka (651) 284-1234.

Waa ay adkaan kartaa in balan la helo. Horey u sii qabso balanta ugu yaraan 3-4 asbuuc.

Dib ugu Noqo Rugta DVS



Qaado Imtixaanka Wadadda

Waxa aad ka [baran kartaa imtixaanka wadadda barta](#). Waxa ay kuu sheegi faahfaahino ku saabsan imtixaanka iyo dukumiintiyadda aad u baahan inaad soo qaadato. Waxa aad u baahan tahay inaad bixiso khidmad si aad u qaadato imtixaanka kolka aad goobta tagto. Khidmaddu waa \$38.00. Ku bixi khidmadda jeeg, jeega idman, cadaan, kaarka bangiga ama kaarka amaahda ama xafiisyadda intooda badan waxa ay qaataan kaararka bangiyada iyo kuwa amaahda. Haddii aad rabto laysinka bilan ama Aqoonsiga Dhabta ah (Real ID), waxaa jira khidmado kale oo la bixiyo. Khidmadahu waa ay is bedeli karaan. [Eeg ka hor inta aadan tagan barta](#). Haddii aad ku dhacdo imtixaanka labo goor, waa inaad bixiso \$20 mar walba oo aad mar kale isku daydo.



Buuxinta Codsiga Laysinka Darawalka

Kolka aad ku baasto imtixaanka wadadda, buuxi codsiga laysinka darawalka. Ka hel rashiid codsigaaga laysinka darawalka qorna buundadda aad ka keentay imtixaanka wadada. Waxyaabaha 2 ahi waa laysinkaaga darawalka ee ku meelgaarka ah.

Haddii aad ka yar tahay 21 sanno jir, laysinkaaga waxaa lagu qori: ka yar 21.” Waxa uuna dhici maalinta aad 21-sanno jir noqoto. Waxa aad dalban kartaa laysinka dadka ka weyn-21-sanno jirka 3 asbuuc ka hor inta aadan 21-sanno jirsan. Wixii markaa ka dambeeya, lasysinkaagu waxa uu dhici 4 tii sannaba mar.



Ku Hel Laysinkaaga Boostadda

Waxa aad ku heli kartaa laysin dhab ah boostada. Waxa aad ka eegi [kartaa meesha ay marayso xaalka laysinkaagu](#) barta iyadoo ku soo jirta qaybta “More Driver Services” (*Adeegyadda Kale ee Darawalka*).













Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

Sidda Lagu Codsado Laysinkaaga Darawalka ee Minnesota

How to Apply for Your MN Driver's License

Tallaabooyinka Taxaalka ah si aad u Hesho Laysinkaaga Darawalka

- Dooro Nooca Laysinka ah ee aad Rabto 
- Akhri Barana Akhbaarta Buuga Gacanta 
- Horey- u sii Dalbo Balansana Imtixaankaaga Aqoonta 
- Tag Rugta DVS 
 - Qaado imtixaanka Aqoonta 
 - Ku Baasida imtixaanka Araga 
 - Dalbashada Barmidka 
- Barashadda Darawalnimada 
- Qabso Balantaada Imtixaanka Wadadda (sidoo kalena la yiraa imtixaanka xirfadaha) 
- Dib ugu Noqo Rugta DVS 
 - Qaado Imtixaanka Wadadda 
 - Buuxinta Codsiga Laysinka Darawalka 
- Ku Hel Laysinkaaga Boostadda 